



## **Qadooyin lacag la'aan ah, hawlo ayaa xagaaga oo dhan laga heli karaa beeraha nasashada Portland.**

Ardayda u baahan in ay helaan cunto iyo hawlo inta lagu jiro xagaagu way heli karaan iyada oo la isticmaalayo barnaamijka Summer Free For All, oo ah iskaashi u dhexeeya Beeraha Nasashada Dadweynaha Portland iyo Beerahaha Nasashada & Raaxada Portland

Barnaamijka wuxuu bixin doonaa qadooyin lacag la'aan ah, muusik ka kala socda adduunka oo idil, filimaan qoyska u wanaagsan, farshaxan, ciyaaraha isboortiga iyo ciyaaraha caadiga oo ka dhacaya beeraha nasashada Portland xagaaga oo idil. Dabaasha oo lacag la'aan ah ayaa la heli doonaa, iyada oo aan la isdiwaan gelin, oo ka jirta barkadaha lagu dabaasho ee magaalada kuwaasi oo la helayo maalmo iyo saacado go'an.

Jadwalka waxaa sidoo kale ku jira dhowr bandhig dhaqameed, oo ay ka mid yihiin Maalinta Tonga, Bandhiga Dhaqanka ee Muslinka iyo Bandhiga Latino.

Buug-yare leh liiska dhacdooyinka, goobaha, taariikhaha iyo wakhtiyada ayaa [laga heli karaa internet-ka](#). Buug-yaraha waxaa sidoo kale la helayaa isaga oo ku qoran sideed luqadood oo kale iyada oo la adeegsanayo [Website-ka Beeraha Nasashada Portland](#).